



Kusoo dhawoow

## Xarunta qoyska ee Prisman



Xarunta qoyska ee Prisman waa bar kulan dadka markii ugu horeysey waalid noqonaya iyo waalidiinta haysta caruurta da'doodu u dhaxayso 0–6 sano. Isku hal goob ayaa la idiinkaga casumayaa adeegyo kala duwan oo macno u samaynaysa caruurta iyo waalidiinta cafimaadkooda iyo baraarhooda.



## Xanaanada u furan in lasoo bookhdo

Kusoo dhawoow si aad ula kulantid caruuraha iyo waalidiinta kale. Halkaan waad ku cayaari kartaan, wax baad ku abuuri kartaan, ku heesi kartaan, ku akhrinsan kartaan iyo inaad ka qayb qaadataan wax qabadka meesha ka socda. Wax lacag ah ma jooqto inaa timaadid, adiga ayaan ka masuul ah ilmahaaga. Waxaad meesha ka gadan kartaa shaah iyo kafee. Ka fiiro xiliyada ay xaruntu furan tahay halkaan: [Facebook/familjecentrumprisman](https://www.facebook.com/familjecentrumprisman)



## BHV-kalkaaliso

BHV-kalkaaliso waxay bixisaa talo iyo taageero la xiriirta waalidnimadaada iyo su'aalaha ku saabsan ilmaha cafimaadkooda iyo korriimadooda. La kulanka waalidiinta kale waxay ku siinaysaa xog kale oo dheeri ah iyo fursad aad adigu kula wadaagi kartid dadka khibradaada.



## Umuliso

Qaybta umulisooyinka ee Mark waa qayb ka mid ah xarunta qoyska ee Prisman wax yaalaha ay qabtaana waxaa ka mid ah waxbarida waalidiinta. Waxaad umuliso kala xiriiri kartaa maalmaha shaqada teleefoon 010 435 95 30 ama adeega interneydka: [www.vgregion.se/markbarnmorskemottagning](http://www.vgregion.se/markbarnmorskemottagning)



## Talo bixin arimaha bulshada ku saabsan

Qof ka talo bixiya arimaha qoyska ayaa wuxuu bixnayaa talo iyo taageero ku saabsan dhibka kiisa yar iyo kan weynba.

Waxaa kaloo xog lagaa sii karaa waxa hay'ada arimaha bulshada ee cayrta kaa caawin karto marxalado kala duwan.

## Xiriirka iyo xiliyada aan furanahay

Xarunta qoyska ee Prisman waxay furan tahay isniin–jimce  
Xiliyada aan furanahay halkaan ka fiirso: [www.mark.se/prisman](http://www.mark.se/prisman)

Waxaan jecelnahay inaad nagala socotid bartayada  
facebook ga: [facebook.se/familjecentrumprisman](https://facebook.se/familjecentrumprisman)

## Xarunta qoyska ee Prisman wuxuu ka kooban yahay

- **Xanaanada u furan in lasoo bookhdo**  
Dadka markoodii ugu horeysey waalidka noqonaya iyo dhamaan dadka haysta caruurta 0–6 sano. Macalin xanaano, kalkaaliso cauurta qaabilsan iyo macalin ayaa ka shaqeeya xanaanada u furan in lasoo bookhdo
- **BHV-kalkaaliso**
- **Talo bixin arimaha bulshada la xiriira**
- **Umuliso**  
Umulisada waxaa laga heli karaa maalmaha shaqada teleefoonkaan 010 435 95 30 ama interneydka: [www.vgregion.se/markbarnmorskemottagning](http://www.vgregion.se/markbarnmorskemottagning)

Dhamaan shaqaalaha xarunta ka shaqeeya waxaa saaran sir xajin.

## Xarunta qoyska Prisman

Teleefoon: +46 (0)320 21 74 75

E-mayl: [familjecentrumprisman@mark.se](mailto:familjecentrumprisman@mark.se)



# Mark

## Xarunta qoyska Prisman

Adreeska lagu booqan karo:  
Varbergsvägen 50, 511 61 Skene



VÄSTRA  
GÖTALANDSREGIONEN

## Närhälsan



VÄSTRA  
GÖTALANDSREGIONEN

